


## Cudurka Fayraska Korona 2019 (COVID-19) Sida Loola Socdo Naftaada


Raac talooyinka uu ku siiyay bixiyaha adeegga daryeelkaaga caafimaad.

Haddii aad qabtid su'aalo, ama aad dareento in xaladaadu ay ka sii dartey, la xiriir bixiyaha adeegga daryeelkaaga caafimaad, Telehealth (1-866-797-0000) ama qaybtaada caafimaadka dadweynaha.


### La-soco calaamadaha muddo 14 maalmood ah ka-dib marka aad wajahdo khatarta cudurka



Qandho



Qufac



Neefsiga oo dhib kugu noqdo

### Ka fogow goobaha dadweynaha

- Ka fogow goobaha ay dadweynuhu ku badan yihiin iyo goobaha aadan si fudud naftaada gooni isaga sooci karin dadka kale (ugu yaraan laba mitir) haddii aad xannuunsato.
- Haddii aadan awoodin in aad ilaaliso masaafada labada mitir ee aad dadka kale u jirsanayso, xiro af-xir aan ahayn mid caafimaad ama weji xir si aad uga ilaaliso dadka kale dhibcahaaga suuragalka ah ee cudurka faafiya.

### Waxa la sameeyo haddii aad isku aragto calaamadahan ama [astaamo kasta oo kale](#)

- Isla-markiiba gooni-isu-sooc ka-dibna la xiriir qaybtaada caafimaadka dadweynaha iyo bixiyaha adeegga daryeelkaaga caafimaad.
- Si aad gooni-isu-soocdo waxaad u baahan doontaa:
  - Tilmaamo ku saabsan [sida la gooni la isu-sooco](#)
  - Saabuun, biyo iyo/ama gacan nadiifiye ay aalkolo ku jirto oo aad gacmahaaga ku nadiifinayso
- Marka aad booqanayso bixiyaha adeegga daryeelkaaga caafimaad, iska ilaali in aad adeegsato gaadiidka dadweynaha sida tareenka dhulka hoostiisa mara, taksiyada iyo gaadiidka la wadaago. Haddii aan laga maarmi karin, xiro af-xir ka-dibna u jirso masafo laba mitir ah dadka kale ama isticmaal kursiga dambe haddii aad raacayso gaari.

### Wax ka baro fayraska

COVID-19 waa fayras cusub. Wuxuu ku faafaa dhibcaha ka yimaada neef-mareenka qof xannuunsan oo gaara dadka kale ee ay la yeeshaan xiriirka dhow sida dadka kula nool guriga ama kuwa daryeelka siiya. Waxaad sidoo kale macluumaadkii ugu dambeeyay ee ku saabsan cudurka COVID-19 ka heli kartaa mareegtada Wasaaradda Caafimaadka ee Dowlad-Goboleedka Ontario: [ontario.ca/coronavirus](https://ontario.ca/coronavirus).

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah fadlan la xiriir: \_\_\_\_\_

Macmoolaadka dokumentigan ku qoran waa midkii 31-ka Luulyo, 2020